



Waxaa muslim kasta xaq ku ah, inuu qubaysto todobadii maalmoodba maalin, oo dhaqo madaxiisa iyo jirkiisoo dhan

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay ayaa yiri: " Waxaa muslim kasta xaq ku ah, inuu qubaysto todobadii maalmoodba maalin, oo dhaqo madaxiisa iyo jirkiisoo dhan".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulku scw wuxuu sheegay inay xaq sugan ku tahay qofkastoo muslima qaan gaara, caaqila, inuu qubaysto todobada bari ee usbuuca maalin, oo uu maalintaa uu dhaqo madaxiisa iyo dhamaan jirkiisa, isagoo ka doonaya nadaafad iyo dahaaro, waxaana maalmaha ugu haboon maalinta Jumcaha, sida laga fahmayo riwaayadaha qaarkood, qubayska maalinta jumcaha salaada ka hor waa suno aad loo adkeeyey, xataa haduuba qubaystay khamiistii tusaale ahaan, waxaana waajibnimada ka leexiyey, hadalkii Caa'isha-Allaha ka raali ahaadee-: "Waxay ahaayeen dadku kuwo shaqooyinkooda ku jira, markay salaada jumcada tagayaana sidoodaa ayey ku tagayeen, waxaana lagu yiri: hadaad soo qubaysan la haydeen", bukhaari ayaa wariyey, riwaayad kale oo bukhaari leeyahay waxay ahayd: "waxay dadku lahaayeen shiir " waana shiirka dhididka iyo wixii la mida, sidaasoo ay tahay waxaa lagu yiri: " hadaad soo qubaysan lahaydeen", dadka kalena waa kaga sii haboon yihiin.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65084>

